

# QALABKA KA QAYBGALKA CODBIXIYAASHA 2026

Office of the Minnesota  
Secretary of State



## Muwaadiniinta Minnesota ee qaaliga ah,

Minnesota muddo dheer ayay hoggaan ka ahayd wadanka oo dhan xagga dhinaca ka qaybgalka codbixinta, arrintaasna si kadis ah kuma iman. Waa natijada deriska, ururro, iyo shaqo-bixiyeyaal si wadajir ah u wada shaqeeya si ka qaybgalka dimuqraadiyadda loo fududeeyo loona caadiyeeyo. Mas'uuliyadda muwaadinnimo iyo ka qaybgalka codbixinta sannad kasta waa mid muhiim ah.

Sannadka 2026, daweynaha Minnesota oo dhan waxay ka qayb geli doonaan doorashooyinka hordhaca ah iyo doorashada guud ee dhexe (midterm). Doorashooyinkaas hoggaan iyo go'aanno ayay qaabeeyaan, kuwaas oo saameeya dugsiyada, goobaha shaqada, wadooyinka, iyo bulshooyinka. Cod kastaba door muhiim ah ayuu ka qaataa hubinta in dowladda ay ka turjunto codadka bulshada ay u adeegto.

Si loo taageero dadaalka wacyigelinta, xafiiskayga qalab dhammaystiran oo dhexdhexaad ah (nonpartisan voter participation toolkit) ayuu cusboonaysiiyey. Qalabkaa waxaad ka dhex heli kartaa fariimo diyaar ah, jadwal, iyo agab kaa caawinaya wacyigelinta iyo dhiirrigelinta codbixiyeyaasha aad ku xiran tahay. Waxaan idinku casuumnaynaa inaad agabkan aad waafajisaan dhagaystayaashiinna ama si fudud u koobiyaysaan oo aad si ballaaran u wadaagtaan.

Waad ku mahadsan tihiin inaad noqotaan lammaane lagu kalsoon yahay oo xoojinaya ka qaybgalka muwaadiniinta iyo inaad gacan ka geysataan.

Daacadnimo

A handwritten signature in black ink that reads 'Steve Simon'.

Steve Simon

Xoghayaha Gobolka Minnesota



**Sii wad dhaqanka sharafka leh ee Minnesota ee ka qaybgalida sare ee codbixinta. Fariimo fudud oo la isticmaali karo iyo xiriiriyeyaal ku dar isgaarsiinta shaqaalaha iyo qoraallada baraha bulshada.**

Booqo [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) si aad u hesho dhammaan macluumaadka codbixinta aad uga baahan tahay.

Macluumaad dheeraad ah ama wixii su'aalo ah, la xiriir Melanie Hazelip lambarkeedu yahay 612-327-1621.

# DULMAR KOOBAN OO KU SAABSAN QALABKA QAYBGALKA CODBIXIYAASHA 2026

## Qaybta 1: Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey:

Doorashooyinka Gaarka ah. ....	4
Maalinta Doorashada Hordhaca ah. ....	6
Maalinta Qaranmeed ee Diiwaangelinta .....	8
Codbixiyeyaasha Codbixinta Hore .....	9
Samee Qorshe aad ku Codayso. ....	10
Maalinta Doorashada Guud .....	12

## Qaybta 2: Qalabyo iyo Fikrado Dheeraad ah oo Wacyigelin ah. .... 14

## Qaybta 3: Iimayllo Dheeraad ah, Baraha Bulshada, iyo Wargeysyada

Elektaroonigga ah .....	16
-------------------------	----

---

# Jadwalka Doorashooyinka 2026

## DOORASHOYINKA GAARKA AH

### 14-ka bisha Abriil, sannadka 2026

- Doorasho Gaar ah – Faribault County (Su'aal)
- Doorasho Gaar ah ee Dugsiga Degmada ISD 1 – Aitkin (Su'aal)
- Doorasho Gaar ah ee Dugsiga Degmada ISD 13 – Columbia Heights (Boos Banaan)
- Doorasho Gaar ah ee Dugsiga Degmadaah ISD 284 – Wayzata (Su'aal)
- Doorasho Gaar ah ee Dugsiga Degmada ISD 482 – Little Falls (Su'aal)
- Doorasho Gaar ah ee Dugsiga Degmada ISD 2170 – Staples-Motley (Su'aal)

### TAARIKHAHA DOORASHOYINKA GAARKA AH

Inta badan doorashooyinka gaarka ah waxaa la qaban karaa oo keliya mid ka mid ah taariikhaha soo socda:

- Talaadada labaad ee bisha Abriil
- Talaadada labaad ee bisha May
- Talaadada labaad ee bisha Agoosto
- Talaadada ugu horreysa ka dib Isniinta ugu horreysa ee bisha Nofeembar

## TAARIKHAHA DOORASHOYINKA JOOGTADA AH

### DOORASHOYINKA DEGMOOYINKA

- 10-ka bisha Maarso, sannadka 2026

### TAARIKHAHA DOORASHADA HORDHACA AH

- 26-ka bisha Juun ilaa 10-ka bisha Agoosto, sannadka 2026: horey ugu codee boosto ahaan ama shaqsi ahaan Doorashada Hordhaca ah
- 21-ka bisha Luulyo, sannadka 2026: horay isu diiwaangeli si aad waqti u badbaadiso Maalinta Doorashada Hordhaca ah
- Talaado, 11-ka bisha Agoosto, sannadka 2026: Maalinta Doorashada Hordhaca ah

### TAARIKHAHA DOORASHADA GUUD

- 18-ka bisha Sebtembar ilaa 2-da bisha Nofeembar, sannadka 2026: hore ugu codee boosto ahaan ama qof ahaan Doorashada Guud
- 13-ka bisha Oktoobar, sannadka 2026: horay isu diiwaangeli si aad waqti u badbaadiso Maalinta Doorashada
- Talaado, 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026: Maalinta Doorashada Guud

### DOORASHOYINKA XAFIISYADA FEDERAALKA IYO GOBOLKA

Maalinta Doorashada Guud, dhammaan dadka Minnesota waxay u codayn doonaan:

- *U.S. Senator*
- *U.S. Representative*
- *Governor and Lieutenant Governor*
- *Secretary of State*
- *State Auditor*
- *Attorney General ( Xeer ilaaliyaha Guud)*
- *State Senator and State Representative*
- *Judicial seats*

Codbixiyeyaashu sidoo kale waxay u codayn karaan xafiisyada heer degmo iyo kuwa maxalli ah iyo su'aalaha warqadda codbixinta 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026.

# DOORASHOYINKA GAARKA AH

## Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Doorashooyinka Gaarka ah.

Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan ka hor mid kasta oo ka mid ah taariikhaha doorashooyinka gaarka ah ee kor ku xusan.

Doorashooyinka gaarka ah waxaa loo isticmaalaa buuxinta jagooyinka bannaan ama go'aaminta su'aalaha warqadda codbixinta; waxaa la qaban karaa waqtiyo kala duwan inta lagu jiro sannadka, waxaana sidoo kale la qaban karaa isla waqtiga doorashooyinka joogtada ah.

---



## TALO BIXIN AH FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL

---

### Cinwaanka: Macluumaadka Doorashada Gaarka ah

Gacaliye/Gacaliso [magaca ay ku socoto],

Marka aan ka fikirno doorashooyinka, inta badan waxaan diiradda saarnaa doorashooyinka waaweyn. Laakiin doorashooyinka gaarka ah iyagana sidoo kale waa muhiim – mararka qaarkoodna xitaa way ka saamayn badan yihiin.

Doorashooyinka gaarka ah waxaa loo qabtaa si loo buuxiyo jagooyinka bannaan loona hubiyo in bulshadiinnu ay sii hesho matalaad. Doorashooyinkani waxay go'aamin karaan cidda qaadata go'aannada arrimaha saameeya nolol maalmeedka laga bilaabo adeegyada maxalliga ah ilaa siyaasadaha heer gobol ama qaran.

Maadaama dad tiro yar ay caadi ahaan ka qayb qaataan doorashooyinka gaarka ah, cod kasta wuxuu yeeshaa miisaan ka sii weyn. Tiro yar oo codad ah ayaa go'aamin karta natiijada – taasoo ka dhigan in ka qaybgalkaagu runtii muhiim yahay.

Codkaagu waa muhiim – ma aha oo kaliya sannadaha doorashooyinka waaweyn, balse waa muhiim mar kasta oo codbixiyeyaasha looga yeero goobaha codbixinta. Haddii aad qabto wax su'aalo ah. Wac 877-600-VOTE, fariin u dir 651-217-3862, ama iimayl u dir [secretary.state@state.mn.us](mailto:secretary.state@state.mn.us).

Waad ku mahadsan tahay inaad tahay codbixiye firfircoon oo xog ogaal ah,

[Saxiixaaga]



## WARBAAHINTA BULSHADA LAGU TALIYAY

### 📣 Doorasho gaar ah ayaa soo socota! OO UU

Ka qaybgal yar = saameyn sare oo uu cod kasta leeyahay.

- ✓ Hubi u-qalmitaankaaga
- ✓ Hel fursadahaaga codbixinta
- ✓ Dhiib codkaaga

Codkaagu weli waa muhiim – isticmaal.

[mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah


Ma u malaynaysaa in doorashooyinka gaarka ahi aysan muhiim ahayn? Mar kale ka fikir.

Natiijooyinka badanaa waxaa go'aamiya codad tiro yar ah.

🗳️ Marka ka qaybgalka uu yar yahay, cod kasta wuxuu yeeshaa awood badan.

Hubi taariikhda, ogow fursadahaaga, oo ka qayb qaado doorashada gaarka ah.

Aad [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah



# DOORASHADA HORDHACA AH

**Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Doorashooyinka Horudhaca ah.**

Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan **toddobaadka 13-ka bisha Luulyo, sannadka 2026**. Doorashada Hordhaca ah waa tan go'aamisa cidda ku jirta warqadda codbixinta Doorashada Guud ee bisha Nofeembar.



## FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL LAGU TALIYAY


Cinwaanka: Macluumaadka Doorashada Hordhaca ah


Gacaliye [magaca qaataha],


Doorashada Hordhaca ah ee Minnesota 11-ka bisha Agoosto, sannadka 2026. Doorashadani waxay go'aamisaa musharaxiinta ka muuqan doona warqadda codbixinta Doorashada Guud ee 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026. Codkaagu wuxuu muhiim yahay marxalad kasta oo habka doorashada ah.

Hubi inaad diiwaangashan tahay oo aad diyaar u tahay inaad codeyso. Booqo [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) si aad u hubiso xaaladda diiwaangelintaada codbixiye ahaan ama aad isu diiwaangeliso.

Hababka Codbixinta:

 Codbixin shaqsi ahaan – Inta badan goobaha codbixinta waxay furan yihiin 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo ee maalinta doorashada.

 Codbixin Hore – Minnesota waxay bixisaa fursado codbixin hore. La xiriir xafiiska doorashada ee deegaankaaga.our [local election office](#).

 Codbixin Maqan (Absentee Voting) – Dalbo warqadda codbixinta maqan adiga oo onleen u maraya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov).


Wac 877-600-VOTE, text 651-217-3862, ama iimayl udir [secretary.state@state.mn.us](mailto:secretary.state@state.mn.us) oo weydii su'aalahaaga

Noqo codbixiye oo codkaaga hala maqlo.

[Saxiixaaga



## BARAHA BULSHADA EE LA TALO BIXIYEEY

 Doorashada Hordhaca ah ee Minnesota waa 11-ka bisha Agoosto, sannadka 2026. Hubi diiwaangelintaada oo codee hore ama Maalinta Doorashada. Booqo maanta [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov).

Doorashooyinka hordhaca ah waa halka ay wax walba ka bilaabmaan.

Codbixintaada doorashada hordhaca ah waa fursadda aad ku dooran karto cidda u gudbaysa marxaladda xigta iyo arrimaha mudnaanta la siinayo.

Hadda samee qorshahaaga codbixinta adda adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov).

**PRIMARY ELECTION**  
AUGUST  
**11**  
HERE WE VOTE  
MNVOTES.GOV

**DID YOU KNOW?**  
Minnesota does not have party registration. Voters can choose which party ballot to participate in when they vote in a primary election.  
HERE WE VOTE  
MNVOTES.GOV

**PRIMARY ELECTION: EARLY VOTING**  
June 26 - August 10  
VOTE EARLY  
HERE WE VOTE  
MNVOTES.GOV  
You can vote early by ballot or in person at an early voting location.  
<https://www.sos.mn.gov/elections-voting/other-ways-to-vote>

**PRIMARY ELECTION: EARLY VOTING**  
June 26 - August 10  
BALLOT  
HERE WE VOTE  
MNVOTES.GOV  
You can vote early by absentee ballot  
<https://mnvotes.sos.mn.gov/abrequest/index>

# MAALINTA QARAN EE DIIWAANGELINTA CODBIXIYAASHA



## Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha

Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan **toddobaadka 7-da bisha Sebtembar, sannadka 2026.**

Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha waa Talaado, 15-ka bisha Sebtembar, sannadka 2026. Maalintan u isticmaal inaad ku dhiirrigeliso bulshadaada, saaxiibbada, deriska, iyo shaqaalaha inay isu diiwaangeliyaan codbixinta ama ay xaqiijiyaan diiwaangelintooda ka hor Doorashada Guud.



### FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL LAGU TALIYAY

Cinwaanka: Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha!

Gacaliye [ku dar magaca qaataha],

15-ka bisha Sebtembar waa Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha [National Voter Registration Day](#). IHaddii aadan diiwaangashanayn, ama aad guurtay ama aad beddeshay magacaaga, fadlan hadda is diiwaangeli si aad ugu diyaar garowdo Doorashada Guud ee 3-da bisha Nofeembar. Waxaad iska diiwaangeli kartaa onleen ahaan adiga oo maraya [mnvotes.gov/register](https://mnvotes.gov/register) oama xafiiska doorashada ee deegaankaaga.

Ha illoobin in dhallinyarada da'doodu tahay 16 iyo 17 ay horay isu diiwaangelin karaan si si toos ah loogu diiwaangeliyo marka ay gaaraan 18 sano.

Aan hubinno in qof kasta oo u qalma Minnesota uu diyaar u yahay inuu codeeyo bisha Nofeembar.

Hel dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov). Wac 877-600-VOTE, fariin u dir 651-217-3862, ama iimayl u dir [secretary.state@state.mn.us](mailto:secretary.state@state.mn.us) haddii aad qabto wax su'aalo ah.

[Saxiixaaga]



### BARAHA BULSHADA EE LA TLAGU TALIYAY

📣 Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha waa 15-ka bisha Sebtembar! Is diiwaangeli ama cusboonaysii diiwaangelintaada adiga oo booqanaya [mnvotes.gov/register](https://mnvotes.gov/register).

Ma guurtay? ✅ Magaca ma beddeshay? ✅ Hadda ma buuxisay 18 sano? ✅ Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha waa waqtiga ugu fiican ee aad xogtaada ku cusboonaysiin karto. Codbixiyeyaasha Minnesota waxay isu diiwaangeli karaan onleen ama Maalinta Doorashada – ka bilow [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov).

# CODBIXINTA HORE

## Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Codbixinta Hore

Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan toddobaadka **18-ka bisha Sebtembar, sannadka 2026**. Dadka Minnesota waxay haystaan 45 maalmood oo ay ku codeeyaan hore. Codbixinta hore ee boostada ama qof ahaan waxay bilaabanaysaa 18-ka bisha Sebtembar, sannadka 2026.



### FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL LAGUI TALIYAY

Cinwaanka: Hore u Codee sannadka 2026

Gacaliye [magaca qaataha],

Waxaad bilaabi kartaa codbixinta hore ee Doorashada Guud laga bilaabo 18-ka bisha Sebtembar, sannadka 2026. Codbixinta hore ee boostada ama qof ahaan waxay ku siinaysaa doorashooyin iyo fududaan. Ka fogow caqabadaha daqiiqadaha dambe lala kulmo oo si hore u gudbi codkaaga.


La xiriir [local election office](#) ee deegaankaaga ama booqo [mnvotes.gov](#) si aad u barato goobaha codbixinta hore, wakhtiyada kama dambaysta ah, iyo hababka codbixinta boostada.


Samee qorshe aad hore ugu codeeyso. Aad [mnvotes.gov/absentee](#) si aad u codsato warqadda codbixinta, wac 877-600-VOTE, fariin u dir 651-217-3862, ama iimayl u dir [secretary.state@state.mn.us](#) si aad wax badan u ogaato.

[Saxiixaaga]



### BARAHA BULSHADA LAGU TALIYAY

 Codbixinta hore waxay bilaabanaysaa 18-ka bisha Sebtembar, sannadka 2026. Hubi [mnvotes.gov/absentee](#) si aad u hesho faahfaahinta sida hore loo codeeyo. Hore u codee, kana caawi Minnesota inay sii ahaato #1 dhinaca ka qaybgalka codbixinta.

 Codbixinta hore ee Minnesota waxay fududaynaysaa in codkaaga la maqlo – wakhtiga adiga kugu habboon. Waxaad hore u codeyn kartaa boosto ahaan ama qof ahaan ka hor Maalinta Doorashada, taasoo ku siinaysa dabacsanaan iyo fudayd. Samee qorshahaaga, hubi diiwaangelintaada, oo hel goobaha codbixinta hore adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](#).

Ma awoodid miyaa inaad gaarto goobta codbixinta Maalinta Doorashada? Minnesota waxay bixisaa fursado codbixin hore oo ammaan ah oo fudud. Baro sida loo codsado warqadda codbixinta, hel goobaha, oo isu diyaari inaad codeeyso adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](#).

# SAMEE QORSHE AAD KU CODEYSO

Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Samee Qorshe aad ku Codeyso  
Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan **toddobaadka 5-ta bisha Oktoobar, sannadka 2026..**

Daraasado ayaa muujinaya in samaynta qorshe codbixineed ay kordhiso suurtagalnimada in codbixiyuhu uu dhab ahaantii codeeyo. Ka caawi dadka shabakadahaaga ku jira inay sameeyaan qorshahooda codbixinta adiga oo adeegsanaya fariimahan.




## FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL LAGU TALIYAY


Cinwaanka: Samee Qorshe aad ku Codeyso  
Gacaliye [magaca qaataha],


Maalinta Doorashada waa Talaado, 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026. Haddii aad qorshaynayso inaad qof ahaan u codeyso maalintaas, hadda ku qor jadwalkaaga. Haddii aad doorbidayso inaad hore u codeyso, dooro maalin u dhexeysa 18-ka bisha Sebtembar iyo 2-da bisha Nofeembar si aad u codeyso boosto ahaan ama qof ahaan.

Ka hel goobtaada codbixinta, hubi diiwaangelintaada, oo ogow waxa ku qoran warqadda codbixinta adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov). Samaynta qorshe codbixineed waxay kordhisaa fursadda aad codkaaga dhiibi doonto, sidaas darteed maanta samee qorshahaaga. Foomkayaga [Make Your Voting Plan](#) ayaa kaa caawin kara!

Hababka Codbixinta:

 Codbixin Qof ahaan – [inta badan goobaha codbixinta](#) awaxay furan yihiin 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo Maalinta Doorashada.

 Codbixin Hore – Minnesota waxay bixisaa fursado codbixin hore. La xiriiir xafiiska doorashada ee deegaankaaga, [local election office](#).


 Codbixin Maqan (Absentee Voting) – Ka dalbo warqadda codbixinta onleen ahaan adiga oo maraya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov).

La xiriiir Khadka Caawinta Doorashada haddii aad qabto su'aalo: wac 877-600-VOTE, ama fariin u dir 651-217-3862. Waxa kale oo aad iimayl u diri kartaa [secretary.state@state.mn.us](mailto:secretary.state@state.mn.us).


[Your signature]




## BARAHA BULSHADA LAGU TALIYAY

 Samee qorshahaaga codbixinta Doorashada Guud ee Minnesota ee 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026. Aad [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) today. Dhiib codkaaga oo ka caawi Minnesota inay sii ahaato #1 dhinaca ka qaybgalka codbixinta.

Codbixintu way fududaanaysaa marka aad samaysato qorshe. Minnesota gudaheeda taasi waxay ka dhigan tahay inaad ogaato

 goorta aad codeynayso

 meesha aad ka codeynayso

 haddii aad hore u codeyso ama boosto ku codeyso.

Qaado laba daqiiqo si aad u qorshayso codbixintaada adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](http://mnvotes.gov), mustaqbalkaaga ayaa kuugu mahadcelin doonta.

✔ Qorshe ayaa u beddela niyad wanaag ficiil. Codbixiyeyaasha Minnesota waxay dooran karaan Maalinta Doorashada, earlyvoting, ama codbixinta boostada. Mid kasta oo adiga kugu habboon! Samee qorshahaaga codbixinta maanta. Ka hel faahfaahinta [mnvotes.gov](http://mnvotes.gov) aoo ka caawi Minnesota inay sii ahaato #1 dhinaca ka qaybgalka codbixinta!



**HERE WE VOTE**

**VOTER'S BILL OF RIGHTS**

Minnesota Voters have the right to:

- TAKE TIME OFF WORK TO VOTE
- VOTE IF IN LINE BY 8 PM
- REGISTER ON ELECTION DAY
- ASK FOR HELP
- A NEW BALLOT IF A MISTAKE WAS MADE BEFORE A BALLOT WAS CAST
- BRING CHILDREN TO THE POLLS
- BRING A SAMPLE BALLOT

And more...

[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)



**GET THE ANSWERS!**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

**HERE WE VOTE**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

**WHERE DO I VOTE?**

**HERE WE VOTE**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

**YOU CAN VOTE BY MAIL**  
**BALLOT**

**EARLY IN-PERSON**  
**VOTE EARLY**

**OR IN-PERSON ON ELECTION DAY**  
**VOTE ON NOV. 3**

**GET INFORMED! VIEW WHAT'S ON YOUR BALLOT.**  
Your sample ballot shows a list of the candidates and ballot questions you'll be voting on.  
*Remember, you can print a copy of your sample ballot and bring it with you to the polling place when you vote.*  
Visit [MNVOTES.GOV/MYBALLOT](http://MNVOTES.GOV/MYBALLOT) for more information.

**SAMPLE BALLOT**  
Minnesota General Election Ballot

City Offices School Board Question 1

**HERE WE VOTE**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

**DON'T FORGET!**

- ▶ You can register online
- ▶ You can register by paper
- ▶ Or you can register on Election Day!

To learn more, visit: [MNVOTES.GOV/REGISTER](http://MNVOTES.GOV/REGISTER)

**HERE WE VOTE**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

**Voting questions?**

CALL or TEXT our call center staff for answers!

New TEXT messaging service!  
**651-217-3862**

**1-877-600-VOTE**

**HERE WE VOTE**  
[MNVOTES.GOV](http://MNVOTES.GOV)

# MAALINTA DOORASHADA

## Fariimaha Mudnaanta leh ee Talo Ahaan Loo Bixiyey: Maalinta Doorashada Guud Diyaarso inaad dirto isgaarsiimahan **3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026.**

Maalinta Doorashada waa Talaado, 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026. Tani waa fursaddii ugu dambaysay ee codbixiyeyaashu kaga qayb qaadan karaan Doorashada Dhexe (Midterm Election). Ka caawi in cod kasta la dhiibo adiga oo diraya fariimahan.



### FARIIN WARGEYS AMA IIMAYL LAGU TALİYAY

**Cinwaanka:** Maalinta Doorashada waa 3-da bisha Nofeembar, sannadka 2026


Maanta waa Maalinta Doorashada, codkaaguna waa muhiim. Doorashooyinka heer maxalli, gobol, iyo federaal waxay qaabeeyaan bulshooyinkeena, goobaha shaqada, iyo nolosha maalinlaha ah, ka qaybgalkaana waa mid ka mid ah hababka ugu muhiimsan ee codkaaga lagu maqlo.

Goobaha codbixinta waxay furan yihiin 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo, sidaas darteed weli waqti ayaa jira haddii aadan weli codeyn. Xusuusnow, waxaad codeyn kartaa mar hadii aad safka ku jirto ka hor 8:00 fiidnimo!

Waxaad heli kartaa goobtaada codbixinta iyo macluumaad kale adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov). Waxa kale oo aad wici kartaa 877-600-VOTE, fariin u diri kartaa 651-217-3862, ama iimayl u diri kartaa [secretary.state@state.mn.us](mailto:secretary.state@state.mn.us) si lagu caawiyo.

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashada dimuqraadiyaddeenna iyo xoojinta bulshadeenna.

[Saxiixaaga]





## BARAHA BULSHADA LAGU TALIYAY

**VOTE** Maanta waa Maalinta Doorashada! Goobaha codbixinta waxay furan yihiin ilaa 8:00 fiidnimo. Hadda codee oo codkaaga ka dhig mid la maqlo. Wax badan ka ogow [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov). Ka caawi Minnesota inay sii ahaato #1 dhinaca ka qaybgalka codbixinta oo maanta dhiib codkaaga!

**VOTE** Maanta waa Maalinta Doorashada! Goobaha codbixinta waxay furan yihiin 7:00 subaxnimo ilaa 8:00 fiidnimo. Haddii aad safka ku jirto ka hor 8:00 fiidnimo, waad codeyn kartaa. Ka hel goobtaada codbixinta iyo waxa ku qoran warqadda codbixinta [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov). Codkaaga ka dhig mid la maqlo.

Waa Maalinta Doorashada, Minnesota! Haddii aad codeyso ka hor shaqada, ka dib cashada, ama wakhti kasta oo u dhexeeya, maanta waa fursaddaada inaad ka qayb qaadato dimuqraadiyaddeenna. Hubi goobtaada codbixinta, diiwaangelintaada, iyo macluumaadka codbixinta adiga oo booqanaya [mnvotes.gov](https://mnvotes.gov) – kadibna tag oo codee.

**HERE WE VOTE**

**VOTER'S BILL OF RIGHTS**

Minnesota Voters have the right to:

- TAKE TIME OFF WORK TO VOTE
- VOTE IF IN LINE BY 8 PM
- REGISTER ON ELECTION DAY
- ASK FOR HELP
- A NEW BALLOT IF A MISTAKE WAS MADE BEFORE A BALLOT WAS CAST
- BRING CHILDREN TO THE POLLS
- BRING A SAMPLE BALLOT

And more...

**MNVOTES.GOV**

**VOTE ON NOV. 3**

**HERE WE VOTE**

**WHERE DO I VOTE?**

**HERE WE VOTE**

**DON'T FORGET!**  
You have the right to vote if you are in line to vote before 8 p.m.

**HERE WE VOTE**

**GET INFORMED! VIEW WHAT'S ON YOUR BALLOT.**  
Your sample ballot shows a list of the candidates and ballot questions you'll be voting on.  
Remember, you can print a copy of your sample ballot and bring it with you to the polling place when you vote.  
Visit [MNVOTES.GOV/MYBALLOT](https://mnvotes.gov/myballot) for more information.

**SAMPLE BALLOT**  
Minnesota General Election Ballot

**HERE WE VOTE**

**Get your election questions answered.**  
CALL or TEXT our call center for answers!

**TEXT SERVICE**  
**651-217-3862**

**CALL THE ELECTIONS LINE**  
**1-877-600-VOTE**

**HERE WE VOTE**

**HAPPY ELECTION DAY!**

**HERE WE VOTE**

For information on Election Day voting, visit:  
**MNVOTES.GOV/ELECTIONDAY**

**MNVOTES.GOV**

# BARAHA BULSHADA EE LAGU TALIYAY



## XAASHIYAHA XAQIIQOYINKA (FACTSHEETS)

[Factsheets](#), Xaashiyaha xaqiiqooyinka ee ku saabsan 18 mowduuc ayaa diyaar u ah in lagu isticmaalo websaydhayada, baraha bulshada, iimaylka iyo daabacaadda. Waad soo dejisan kartaa oo daabacan kartaa nuqullo aad isticmaasho. Qaar badan oo ka mid ah waxay ku jiraan 12 luqadood.

Mawduucyada waxaa ka mid ah:

- Sida loo Codeeyo
- Codbixiyayaasha Cusub
- Diiwaangelinta Maalinta Doorashada
- Hore ugu Codee Warqadda Maqan (Absentee Ballot)
- Ogaaw Xuquuqdaada
- Fasax Shaqo si loo Codeeyo
- Caawinta Codbixiyaha
- Codbixiyayaasha Militariga iyo Kuwa Dibadda Jooga
- Ardayda Kulliyadaha
- Ardayda Dugsiyada Sare
- Codbixinta iyadoo leh Diiwaan Dambiyeed
- Doorashada Hordhaca ah
- Shirarka Degmada (Precinct Caucuses)
- Ardayda Dibadda Jooga
- Maxaa Cusub 2026

Iyo kuwo kale oo badan! Si aad u codsato agabkan bilaashka ah, booqo [our catalogue](#).



## BOOQASHADA XOGHAYAHA GOBOLKA EE KULAMADA BULSHADA IYO SHAQAALAHA

Fadlan ka fiirso inaad ka dhigto ka qaybgalka codbixinta mowduuc laga hadlo oo noqda mid ama in ka badan oo ka mid ah kulamada xaafaddaada, bulsho, ama goobaha shaqada xilligan dayrta. Shaqaalaha OSS waxay kaa caawin karaan dejinta barnaamij, Xoghayaha Gobolka Simon-na wuxuu suurtagal ahaan ka soo qayb geli karaa dhacdooyinka ka dhacaya Minnesota oo dhan.

La xiriir Melanie Hazelip: [melanie.hazelip@state.mn.us](mailto:melanie.hazelip@state.mn.us), 612-327-1621 si aad u jadwaleyso booqasho uu sameeyo Xoghayaha Gobolka Simon ama buuxi foomkan. [fill out this form](#).

## BOOQASHADA XOGHAYAHA GOBOLKA EE KULAMADA BULSHADA IYO SHAQAALAHA

Fadlan ka fiirso inaad ka dhigto ka qaybgalka codbixinta mowduuc laga hadlo oo noqda mid ama in ka badan oo ka mid ah kulamada xaafaddaada, bulsho, ama goobaha shaqada xilligan dayrta. Shaqaalaha OSS waxay kaa caawin karaan dejinta barnaamij, Xoghayaha Gobolka Simon-na wuxuu suurtagal ahaan ka soo qayb geli karaa dhacdooyinka ka dhacaya Minnesota oo dhan.

Si aad u ballan Voter 101 u sameysato, la xiriir [melanie.hazelip@state.mn.us](mailto:melanie.hazelip@state.mn.us), 612-327-1621.





## FIIDIOYIN

La wadaag fiidiyadan websaydhada, baraha bulshada, iimaylka, isgaarsiinta elektaroonigga ah ee kale, shaashadaha gudaha, iyo dhacdooyinka.

- “[It’s Election Year, Minnesota!](#)” “Waa Sannadka Doorashada, Minnesota!” (2 daqiiqo) — Fiidiyo firfircoon oo sawir-gacmeed ah ayaa siinaya codbixiyeyaasha dulmar ku saabsan habka codbixinta. Waxa kale oo lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#).
- “[Vote Early, Vote Absentee!](#)” “Hore u Codee, Ku Codee Maqan!” (1 daqiiqo iyo 30 ilbiriqsi) — Fiidiyo sawir-gacmeed ah ayaa siinaya codbixiyeyaasha faahfaahin ku saabsan habka codbixinta maqan.
- “[Get Ready to Vote!](#)” (“Isu Diyaari inaad Codeyso!” (30 ilbiriqsi) — Fiidiyo sawir-gacmeed ah ayaa bixiya dulmar ku saabsan qalabka waxtarka leh ee codbixiyaha. Waxa kale oo lagu heli karaa afafka [Hmong](#), [Somali](#) iyo [Spanish](#).
- “[Ojibwe Tribal Voting](#)” “Codbixinta Qabiilka Ojibwe” (4 daqiiqo) – Fiidiyo uu ku hadlayo qof asal ahaan Ojibwe ah ayaa bixiya macluumaad guud oo ku saabsan codbixinta iyo faahfaahin gaar ah oo ku saabsan codbixinta bulshada asaliga ah. Waxa kale oo lagu heli karaa . [Ingiriisi](#).
- Macluumaad badan ka hel [www.youtube.com/@mnsecstate](http://www.youtube.com/@mnsecstate)



## FURSADO GAAR AH

Fikrad samee; la imow habab cusub oo lagu dhiirrigeliyo ka qaybgalka muwaadiniinta iyo codbixinta.

- Ku dar [Taariikhda doorashada](#) to computer login screen
- Ku dheji xaashiyaha xaqiiqooyinka [factsheets](#) looxyada farriimaha
- Ku dheji xaashiyaha xaqiiqooyinka [factsheets](#) qolalka nasashada
- La wadaag sawirradaada codbixinta
- Weydii bulshadaada inay wadaagaan markii ugu horreysay ee ay codeeyeen
- Samee websaydh yar oo codbixiyeyaasha ah

Si aad u dalbato xaashiyaha xaqiiqooyinka, bilaash ah, booqo buuggeenna agabka [our catalogue](#).

# FARIIMO DHEERAAD AH OO LOOGU TALAGALAY IIMAYLO, QORAALLO BARAHA BULSHADA, IYO WARGEYSYADA ELEKTARONIGGA AH

Waxaa laga yaabaa in bulshadiinna ama shirkaddiinnu u baahato isgaarsiin ku saabsan mowduuc gaar ah oo la xiriira codbixinta. Halkan waxaa ku yaal mowduucyo dheeraad ah oo codbixineed oo aad tixgelin kartaan. Ka hel sawirro cabbir buuxa oo diyaar u ah baraha bulshada ama iimaylka halkan [here](#).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mowduucyadan iyo kuwo kale oo badan waxaa laga heli karaa [mnvotes.gov](#). Haddii aad rabto caawimaad ku saabsan mowduuc gaar ah ama caddeyn su'aal codbixineed, fadlan la xiriir Melanie Hazelip:

[melanie.hazelip@state.mn.us](mailto:melanie.hazelip@state.mn.us) | 612-327-1621



## MOWDUUCYO CODBIXINEED OO DHEERAAD AH

**Diiwaangelinta Codbixiyaha:** Haddii aad ku cusub tahay Minnesota, aad dhawaan ku guurtay gudaha Minnesota, aadan codeyn in ka badan 4 sano, ama aad markii ugu horreysay codeynayso, waxaad u baahan doontaa inaad is diiwaangeliso ka hor inta aadan codeyn. Waxaad is diiwaangelin kartaa Maalinta Doorashada, laakiin waqti ayaad badbaadinaysaa haddii aad diiwaangelintaada dhamaystirto ka hor 13-ka bisha Oktoobar, sannadka 2026.

- [Diiwaangelin onleen ah](#)
- [Daabac foomka diiwaangelinta](#) oo ku soo celi boosto
- Haddii aad qorshaynayso inaad is [rdiiwaangeliso Maalinta Doorashada](#), diyaar garow!
- Dhallinyarada da'doodu tahay 16 iyo 17 [horay aya isu diiwaangelin karaan](#)
- Waad [codeyn kartaa adigoo leh diiwaangel dambiyeedd](#), haddii aadan hadda aad aheyn qof xabsi kujira

## Shaqaalaha militariga iyo qoysaskooda haddii ay ka maqan yihiin gurigooda:

- Dalbo warqadda codbixinta maqan [\(absentee ballot\)](#) hadda
- Soo celi warqadda codbixinta maqan [taariikhyada la soo jeediyey](#)

## Ma u baahan tahay inaad ku codeyso Maqan? Sidaan samee

- Haddii aad ka shaqaynayso gobol kale ama aadan guriga joogin:
  - [Codbixin shaqsi ahaan](#) ka hor inta aadan bixin
  - Warqad codbixin oo boosto lagu diro [\(Mail-in absentee ballot\)](#)
- Haddii aad ka shaqaynayso ama u safrayso dibadda dalka:
  - [Codbixin qof ahaan](#) ka hor inta aadan bixin
  - Codsiga warqadda codbixinta maqan ee dibadda [\(Overseas absentee ballot application\)](#)

---

### **Maqnaanshaha Cudurdaar La'aan, Codbixinta Boostada(No Excuse Absentee Voting By Mail)**

- Uma baahnid sabab aad ugu codeyso codbixin maqan. Codbixiye kasta ee leh codbixin wuxuu dalban karaa warqad codbixin oo boosto lagu soo diro, [apply for a mail-in absentee ballot](#) kana coderyn karaa isagoo gurigiisa jooga.

### **Codbixinta Hore**

- Codbixiyeyaasha u qalma hadda waxay dhiibi karaan codkooda iyaga oo ka bilaabaya 46 maalmood ka hor Maalinta Doorashada goobaha loo qoondeeyey codbixinta hore ([early voting locations](#))
- Hadda waxaad xaq u leedahay fasax shaqo si aad u codeyso wakhti kasta inta lagu jiro muddada 46-ka maalmood ee codbixinta.

### **Diiwaangelinta goobta codbixinta Maalinta Doorashada**

- Haddii aad qorshaynayso inaad iska diiwaangeliso goobta codbixinta Maalinta Doorashada, waxaad u baahan doontaa aqoonsi sax ah. Waxaa jira dhowr doorasho.

### **Hel goobtaada codbixinta**

- Ma hubtaa meesha aad ka codeyso? Hadda hel goobtaada codbixinta! ([Find your polling location](#)).

### **GOTV**

- Codbixintu waa muhiim! Waa aasaaska dimuqraadiyadeenna. Waa hab muhiim ah oo aad kaga qayb qaadan karto habka dimuqraadiga ah oo codkaaga lagu maqlo. Mararka qaarkood, codkaaga ayaa runtii go'aamiya natiijada doorashada – laga yaabee inuu sannadkan sidaas noqdo. Xaqiiji diiwaangelintaada, hel goobtaada codbixinta, eeg warqaddaada codbixinta. ( [Confirm your registration](#), [find your voting location](#), [check out your ballot](#). Noqo codbixiye!

### **Amniga iyo Daacadnimada Doorashada**

- Nidaamka doorashada Minnesota waa mid la heli karo, ammaan ah, oo sugan.
  - [Boogo websaydhkeenna cusub](#) si aad u barato xaqiiqooyinka doorashada iyo sida aan u ognahay in doorashooyinka Minnesota ay yihiin kuwo caddaalad ah, sax ah, oo ammaan ah
  - Markii dowlad shisheeye ay isku dayday inay jabsato nidaamka doorashooyinka sannadkii 2016, isku daygaas si hore ayaa loo ogaaday loona joojiyey.
  - Saraakiisha sirdoonka federaalka iyo hay'adaha sharciga ayaa dhowaan tijaabiyey amniga nidaamka doorashada Minnesota iyaga oo isku dayday inay jabsadaan. Imtixaanka waan gudubnay.
  - Minnesota si sharaf leh ayay u adeegsataa hab dhaqameed – waxaan isticmaalnaa warqado codbixin oo warqad ah si aad u hubto in codkaaga la tiriyo, si sax ah loo tiriyo, loona kaydiyo haddii mustaqbalka loo baahdo.

### **BARAHA BULSHADA LAGU TALIYAY**



---

#### **18-ka bisha Sebtembar, Warqadaha Codbixinta Maqan Waa La Heli Karaa**

Ka badbaadi waqti Maalinta Doorashada adiga oo jooga raaxada gurigaaga—[Hore ugu codee boosto ahaan ama shaqsi ahaan](#). #mnvotes

#### **15-ka bisha Sebtembar, Maalinta Qaran ee Diiwaangelinta Codbixiyaasha**

Diiwaangelin kasta waa tallaabo loo qaadayo dimuqraadiyad xooggan. [Is diiwaangeli maanta](#). #mnvotes

**6-da bisha Oktoobar, Hal Toddobaad ayaa ka Harsan Wakhtiga Kama Dambaysta ah ee Diiwaangelinta Hore ee Codbixiyaha**

Waxaad iska [Diiwaan gelin kartaa onleenka](#) si aad u codeyso ilaa 13-ka bisha Oktoobar. #mnvotes

**27-ka bisha Oktoobar, Hal Toddobaad ayaa ka Harsan Maalinta Doorashada**

Isu diyaari inaad codkaaga dhiibato oo si firfircoon uga qayb qaadato qaabeynta mustaqbalkeenna. [Halkan ka hel](#) goobtaada codbixinta, saacadaha, iyo waxa looga baahan yahay diiwaangelinta Maalinta Doorashada. #mnvotes

**Sawirrada Baraha Bulshada**

[Halkan](#) waxaad ka heli doontaa sawirro cabbir buuxa leh oo diyaar u ah baraha bulshada ama iimaylka. Si xor ah ugu dar sawirradan isgaarsiintaada.



Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir [Melanie Hazelip](#): 612-327-1621, [melanie.hazelip@state.mn.us](mailto:melanie.hazelip@state.mn.us)